



XAFIISKA
HANTIDHOWRKA GUUD
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**WARBIXINTA BAARISTA
WAXQABADKA EE
MASHRUUCA BIYAHA,
WAXSOOSAARKA IYO
ADKEYSIGA BEERAHA IYO
XOOLO-DHAQASHADA
(BIYOOLE)**

August 2024

TUSMADA WARBIXINTA

| | |
|--|-----------|
| Ereyada la soo Gaabiyay..... | 4 |
| Dulmar Guud..... | 5 |
| CUTUBKA KOOWAAD: HORDHAC | 7 |
| 1.1. Sooyaalka..... | 7 |
| 1.2. Sababta Dhiirigelisay Baarista | 8 |
| CUTUBKA LABAAD: NAQSHADEYNTA IYO HABRAACA BAARISTA..... | 9 |
| 2.1. U jeeddada Baarista | 9 |
| 2.2. Su'aalaha Baarista, Halbeegyada Qiimaynta iyo Ilaha | 9 |
| 2.3. Baaxadda iyo Xuduudaha Baarista..... | 11 |
| 2.4. Hababka Xog-Aruurinta..... | 12 |
| 2.5. Heerarka Baarista | 13 |
| CUTUBKA SEDAXAAD: TILMAANTA MAJAALKA BAARISTA | 14 |
| 3.1. Sharraxaad Guud | 14 |
| 3.2. Sharciyadda..... | 15 |
| 3.3. Ujeeddooyinka..... | 15 |
| 3.4. Qaab-dhismeedka Maamul | 15 |
| 3.5. Nidaamka iyo Hannaanka | 18 |
| 3.6. Funding Structure of the Audited Area..... | 22 |
| CUTUBKA AFRAAD: NATIHOYINKA, GUNAANADYADA IYO TALOOYINKA..... | 23 |
| 4.1. Ceel biyood la dayactiray oo si fiican u shaqeynaya | 23 |
| 4.2. Biyo xireennada aan shaqaynayn, U hogaansami la'aanta Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) iyo Agab maqan | 24 |
| 4.2. Cilladaha ka jira biyo xireennada la dhisay iyada oo aan salka bac loo dhigin 33 | |
| 4.3. Maqnaashaha caddeymo ku filan oo lagu taageerayo howlaha Beeraha iyo Xoolaha ee laga hirgeliyay Tuulada Boonkaay ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed | 35 |
| 4.4. Beeraha Bulsho ee la hirgeliyay oo isugu jiray kuwo shaqeynaya iyo kuwo aan shaqeyneyn. | 37 |
| LIFAAQYO..... | 40 |
| a) Lifaaq I: Dokumentiyada Dib-loo-eegay..... | 40 |
| b) Lifaaq II: Daneeyaasha la Wareystay | 41 |
| c) Appendix III: Sites visited. | 43 |



Tix.: XHG/HG-539/2024

Date: 30/08/2024

Guddoomiyaha Golaha Shacabka, BFS

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare, BFS

Mogadishu

**BAARISTA WAXQABADKA BIYAHA LOO ISTICMAALO WAXSOOSAARKA
IYO ADKEYSIGA BEERAHA IYO XOOLO-DHAQASHADA EE MASHRUUCA
BIYOOLE**

Si waafaqsan Cutubka 3aad, Qodobka 5 (17) ee Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (Sharci. Lr. 14, 10-ka September 2023), waxa aan baaris iyo qiimeyn ku sameeyay waxqabadka Mashruuca Biyoole: Biyaha Wax soo saarka iyo Adkeysiga Beeraha iyo Xoolo-dhaqashada, waxaana halkan ku soo gudbinayaa warbixinta.

Baaristan waxaa la sameeyay iyada oo la raacayo Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Guud ee baarisyada Waxqabadka (ISSAI 3000). Heerkan waxa uu waajibinayaa in baarista loo qorsheeyo loona hirgeliyo si loo helo cadeymo dhammaystiran oo ku habboon, kuwaas oo saldhig maangal ah u noqon kara natiijooyinka soo baxay si waafaqsan u jeeddooyinka baaristan Waxqabadka Mashruuca Biyoole Waxa aan aaminsanahay in caddeymaha la helay ay aasaas maangal ah u yihiin natiijooyinka aan helnay iyo gunnaanadka aan gaarnay marka la fiiriyo u jeeddada baarista.

Waxa aan u mahadcelinayaa hawlwadeenadeyda fuliyay baaristan, Sidoo kale, waxa aan uga mahadcelinayaa shaqaalaha Unugga Isku-dubbaridka Mashruuca Biyoole ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga & Horumarinta Dhaqaalaha taageerada iyo wada-shaqaynta ay la sameeyeen hawlwadeenada Xafiiska Hantidhowrka Guud muddadii baarista lagu guda jiray

H.E. Ahmed Isse Cumar
Hantidhowraha Guud JFS

30th Agosto 2024



Ereyada la soo Gaabiyay

| | |
|---------------------|--|
| MoPIED/WQMHD | Wasaaradda Qorsheynta Maalgashiga iyo Horumaninta Dhaqaalaha |
| PDO/UHM | Ujeeddada Hirgelinta Mashruuca |
| OPM/XRW | Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha |
| VDC/GHT | Guddiga Horumarinta Tuulada |
| BOQ/FSH | Faahfaahinta Shuruudaha |
| PAD/DQM | Dukumintiga Qiimaynta Mashruuca |
| POM/HHM | Hagaha Hirgelinta Mashruuca |
| PIU/UHM | Unugga Hirgelinta Mashruuca |
| PCU/UIM | Unugga Isku-duwidda Mashruuca |
| PV | Korontada laga Dhaliyo Cadceeda |
| WASH/BFN | Biyaha, Fayadhowrka, iyo Nadaafadda |

Dulmar Guud

Iyadoo laga jawaabayo xaaladaha abaarta ee sii kordhaya iyo culeysyada adag ee beeraha iyo xoolo-dhaqashada ee Soomaaliya, dowladda ayaa billowday Mashruuca Biyaha, Waxsoosaarka iyo Adkeysiga Beeraha iyo Xoolo-dhaqashada (Biyoole) bishii Juun 2019, iyadoo deeq dhan 42 milyan oo doolar laga helay Bangiga Adduunka. Mashruucan wuxuu ujeedkiisu ahaa inuu hagaajiyo helitaanka biyaha, taageeridda beerashada waarta, iyo kor u qaadista waxsoosaarka xoolaha ee gobollada engagan ee dalka. Hase ahaatee, xaaladaha abaarta ee sii socday ilaa 2022, oo barakiciyay 759,000 qof, saameeyayna 6.1 milyan oo qof, ayaa muujinaya in natiijooyinka mashruucu aysan si buuxda u xallin dhibaataada. Arrintan ayaa keentay in Xafiiska Hantidhowrka Guud uu sameeyo baaris waxqabad si uu u qiimeeyo in Mashruuca Biyoole uu gaaray ujeedkiisii iyo inuu ogaado meelaha suurtoogalka ah ee lagu horumarin karo.

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa lahaydmas'uuliyadda isuduwidada iyo korjoogteynta heer qaran ee fulinta mashruuca Biyoole.

Ujeeddada ugu weyn ee baarista ayaa ahayd qiimeynta in Unugga Isku-duwidada Mashruuca (PCU) ee heer federaal uu si dhammaystiran u xaqiijiyay hirgelinta ilo biyoodyo badan iyo taageerada beeraha iyo xoolo-dhaqashada si waafaqsan ujeeddada guud ee mashruuca.

Natiijooyinka ugu muhiimsan ee ka soo baxay waxaa ka mid ah:

- Laba ka mid ah toddobadii goob biyood ee la booqday waxaa ka muuqday dhismo adag oo wanaagsan, halka saddexda biyo-xireen ee kale ay ka muuqdeen cillado xagga tayada dhismaha ah, taas oo kor u qaaday welwelka laga qabo waxqabadkooda muddada fog.
- Laba biyo-xireen oo ka mid ah toddobada goob biyood ee la kormeeray ayaan shaqaynayn.
- Qaybo muhiim ah oo dhismaha ka mid ah ayaa ka maqan goobaha, sida hababka daawaynta biyaha ee UV, matoorada korontada iyo taangiyada biyaha.
- Kaabayaasha burburay iyo rakibaadda qalabka lagama maarmaanka ah oo aan ku filnayn; iyo
- darjiimooyinka bulshada loo sameeyey ayaa isugu jira qaar shaqaynaya iyo kuwa aan shaqaynayn.

Natiijooyinkan ayaa horseeday in baaritaanku kusoo idlaado in ay jireen dhibaatooyin waawayn oo waxqabadka la xiriira oo ka jiray 66% goobihii la booqday, kuwaas oo saameyn ku yeeshay waxtarka guud iyo waaritaanka hawlaha laga fuliyey

goobahaas, iyo faa'iidooyinka uu mashruucu u leeyahay bulshada goobahaas ee loogu talagalay in uu u adeego.

Hantidhowrku waxa u ku talinaayaa in Unugga Hirgelinta Mashruuca (PIU) ay wax ka qabato cilladaha ka jira kaabayaasha iyo arrimaha beeraha ee la ogaaday, Sidoo kalena la xaqiijiyo qorsheyn iyo fulin hagaagsan oo loogu talagalo mashaariicda la midka ah ee mustaqbalka.

CUTUBKA KOOWAAD: HORDHAC

1.1. Sooyaalka

Sannadkii 2019-ka, Soomaaliya waxa ay gashay dhibaato kale, ka dib markii roobabkii gu'ga ay baaqdeen iyadoo roobabka dayrtii ka horreysay ay yaraayeen, taasoo sababtay hoos u dhac ku yimid dalagii beeraha iyo waxsoosaarkii xoolaha. Tan oo ay u badneyd iney sare u qaaddo tirada dadka ku jira xaalada deg dega oo ay gaarto heerkii 2016/17 oo ahayd ku dhowaad 2.2 milyan oo qof – sidoo kale waxaa adkeyd in dhaqaale loo helo gargaarada bani'aadanimada. Baaqashada roobabka xilli roobaadyadii is xigay ee dayrtii 2018, gu'gii 2019, iyo xagaagii 2019 waxay yeesheen saameyn weyn. Dhacdooyinkaasi waxay sababeen dalaggii beeraha oo aad u xumaaday iyo hoos u dhac ku yimid wax soo saarkii xoolaha, taasoo keentay inay si degdeg ah u xumaato sugnaanta cuntada ee meelaha ay dhibaataadu saameysey. Calaamadaha muuqday ee laga akhrisan karay heerka xaaladda abaarta waxaa kamid ahaa guur-guurka xoola dhaqata oo aan caadi ahayn, xaaladda xoolaha oo sii xumaaneysay, wax soo saarka caanaha oo hoos u dhacay, barakaca dadka ee abaaruhu keeneen, iyo kor u kaca cudurada abaarta la xiriira. Saamayntan xun ayaa durba si weyn loo arkay. [\(1\)](#)

Si loo horumariyo adeegyada biyaha iyo beeraha ee bulshooyinka beeralayda iyo kuwa xoolaha dhaqda ee ku dhaqan dhulka engegan ee Soomaaliya, Dowladda Soomaaliya ayaa ansixisay Mashruuca Biyaha Wax-soo-saarka Beeralayda iyo Xooladhaqatada (BIYOOLE) 25-kii June, 2019, waxaana mashruucan uu soo idlaaday 28-kii February 2023. Mashruuca BIYOOLE waxaa loogu talagalay in wax looga qabto dhibaatooyinka abaareed ee jira iyadoo la hirgelinayo ilo biyoodyo taageerana la siinayo beeralayda iyo xoolo dhaqatada. Mashruuca BIYOOLE wuxuu diiradda saarayay hagaajinta helitaanka biyaha siyaabaha kala duwan loo isticmaalo (isticmaalka dadka, waraabka xoolaha, waraabka yar yar ee beeraha, iyo adeegyada deegaanka) ee dhulka engegan ee Soomaaliya. Marka sidaas la sameeyo waxa la filayey in la ballaariyo dhulka sida wax-ku-oolka loo maareeyo iyo in dadka mashruuca loogu tala galay la gaarsiiyo adeegyo beero iyo sidoo kale kor u qaadista wax-soo-saarka iyada oo kor loo qaadayo hal-abuurka bulshooyinka miyiga ku dhaqan.

Mashruucan ayaa waxaa ku baxay deeq lacageed oo uu bixiyay Bankiga Adduunka, oo gaareysay 42 milyan oo dollar. Wasaaradda Qorshaynta Maalgashiga iyo Horumarinta dhaqaaluhu waxay ahayd hay'adda u xilsaaran isku xirka iyo kormeerka heer qaran. Wasaaradaha kale ee muhiimka ah oo qayb ka ahaa guddiga hagida mashruuca waxaa ka mid ahaa, Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka; Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha; Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa; iyo Agaasinka Deegaanka ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

Mashruuca BIYOOLE waxa uu ujeedadiisu ahayd in la yareeyo saamaynta abaarta iyada oo la samaynayo ilo biyoodyo badan oo lagu taageerayo horumarinta beeraha iyo xoolaha. Ujeedada horumarineed ee gaarka ah ee mashruuca marka la eego Dukumentiga Qiimaynta Mashruuca (PAD) wuxuu ahaa horumarinta adeegyada biyaha iyo beeraha ee bulshooyinka beeralayda-xoolo dhaqatada ah ee ku nool dhulka engegan ee Soomaaliya.

1.2.Sababta Dhiirigelisay Baarista

Sababta keentay in la baaro fulinta mashruuca BIYOOLE ayaa ka dhalatay warbixino sheegaya biyo la'aan oo lagu soo bandhigay mareegaha internetka. Bogagga Internetka ayaa lagu daabacay in 2022-ka ay Soomaaliya weli ka taagan tahay dhibaatooyin abaareed oo ka dhacay meelo badan oo ay ku jiraan goobihii mashruucan laga hirgeliyey.

Sannadkii 2022, mareegta relief ayaa soo bandhigay xog laga helay warbixinta kooxda Fayadhowrka iyo Nadaafadda Biyaha , taas oo iftiimisay in xaaladaha abaartu ay saamaysay ilaa 6.1 milyan oo qof ayna 759,000 qof ka barakiciyeen guryahoodii iyagoo raadinaya biyo, cunto iyo baad. Haweenka iyo gabdhaha ayaa ahaa kuwa ay dhibaataada ugu darani gaartay. Saamaynta abaarta iyo dhibaatooyinka ka dhashay ayaa ka tan batay awoodaha Soomaaliya. Waxaa lagu qiyaasay wakhtigaas, in ilaa 80 boqolkiiba ilihii biyaha ee dalka oo dhan ay gurayeen, ilaa 23kii Abriil 2022, qiyaastii 4.2 milyan oo qof ayay soo wajahday biyo la'aan ba'an iyadoo in ka badan 159 ceelal bulsho oo istaraatiiji ah ay u baahan yihiin hagaajin degdeg ah si loo soo celiyo shaqadooda. (2)

Waxyaabaha aan kor ku soo sheegnay ayaa tilmaamaya in fulinta mashruuca BIYOOLE laga yaabo in aan laga gaarin ujeedooyinkii loo dejiyaya, iyadoo ay jirto in dhaqaale loo qoondeeyay mashruuca. Sidaa darteed, tani waxay ku dhiirigelisay Hantidhowrka Guud inuu ku sameeyo baaris waxqabad sida loo hirgeliyay mashruuca BIYOOLE. Hantidhowrka waxaa sii dhiirigeliyay gaabisyo lagu ogaaday daraasadda hordhaca ah ee mashruuca.

Tixraac:

1. <https://reliefweb.int/report/Somalia/>
2. <https://reliefweb.int/report/somalia/somalia-water-shortage-update-23-april-2022>

CUTUBKA LABAAD: NAQSHADEYNTA IYO HABRAACA BAARISTA

Cutubkani waxa uu qeexayaa ujeedada, baaxadda iyo habraaca baarista, iyada oo la qiimeynayo sida loo hirgeliyay ilo biyoodyada, iyo hawlaha taageerada beeraha iyo xoolaha ee mashruuca BIYOOLE. Cutubku wuxuu faahfaahinayaa su'aalaha baarista, halbeegyada, ilaha halbeegyada iyo hababka xog ururinta, oo ay ku jiraan dib u eegista dukumeentiyada, waraysiyada, iyo booqashooyinka goobaha. Caqabadaha lala kulmay inta lagu jiray baarista, oo ay ka mid tahay gaaritaanka goobaha, ayaa sidoo kale la soo bandhigayaa.

2.1. U jeeddada Baarista

U jeeddada ugu weyn ee baarista waxay ahayd in la lafo-guro in Unugga Hirgelinta Mashruuca (PIU) qaranku ay ku guulaysteen inay hirgeliyaan horumarinta ilo-biyoodyo kala duwan iyo hawlaha taakulaynta beeraha iyo xoolaha kuwaas oo ka qeyb qaadan lahaa xaqiijintka ujeedooyinka guud ee mashruuca oo ahaa horumarinta adeegyada biyaha iyo beeraha ee bulshooyinka xoolo-dhaqatada ah ee ku dhaqan dhulka engagan ee Soomaaliya.

U jeedooyinka gaarka ee baarista waxay ahaayeen in lagu qiimeeyo in:

- a. Hawlaha mashruuca ee lagu hirgelinayo ilo-biyoodyo kala duwan iyo taageerada beeraha iyo xoolaha loo fuliyay sidii qorshuhu ahaa; iyo
- b. Unugga Hirgelinta Mashruuca ee heer Federaal uu si wax ku ool ah u maareysay horumarinta ilo biyoodyada iyo hawlaha beeraha iyo xoolaha.

2.2. Su'aalaha Baarista, Halbeegyada Qiimaynta iyo Ilaha

Shaxdan hoose waxay qeexaysaa su'aalaha baarista, halbeegyada, iyo meelaha laga helayo halbeegyada loo isticmaalay baarista. Kooxda baarista hirgelineysay waxay falanqeyeen sida ay Unugga Hirgelinta Mashruuca u hirgeliyay horumarinta ilo biyoodyo kala duwan, iyo sidoo kale hawlaha beeraha iyo xoolaha, si loo ogaado in la gaaray ujeedooyinkii baarista.

| Su'aalaha Baarista | Halbeegyada Qiimeynta | Ilaha |
|---|---|---------------------------------|
| Su'aasha Baaritaanka 1- Ilaa xad intee le'eg ayay u qabsomeen hawlihii mashruuca (sida ilo-biyoodyo badan, taageerada beeraha iyo xoolaha) sidii loo qorsheeyay? | | |
| Su'aal-hoosaad 1.1- Ma la gaaray u jeedooyinkii gaarka ahaa ee hirgelinta ilo-biyoodyo badan? | Sida ku cad Dukumentiga Qiimaynta Mashruuca (PAD) u jeeddada gaarka ah ee qaybtani waxay ahayd in la hagaajiyo biyaha | Dukumentiga Qiimaynta Mashruuca |

| | | |
|---|---|---|
| | la cabo ee u wanaagsan caafimaadka dadka iyo kuwa loo isticmaalo waxsoosaarka (gaar ahaan wax soo saarka beeraha iyo adeegyada beeralayda ee dib u hagaajinta muuqaalka dhulka), taas oo ka dhigaysa bulshooyinka mashruuca loogu talagalay inay u adkeystaan abaaraha iyo fatahaadaha, maadaama dhulka muuqaalkiisa la hagaajiyo uu iska caabin karo sidoo kalana uu aad ugu adkeysan karo daadka. | |
| Su'aal hoosaad1.2- Ma la gaaray u jeedooyinkii la xiriiray hawlaha beeraha iyo xoolaha? | Sida ku cad PAD, qaybtani waxay xoojin doontaa kobaca iyo horumarinta dakhli-abuurka waxsoosaarka leh oo waara iyada oo loo marayo in bulshada loo fududeeyo helista hantida wax soo saarka leh iyo in bulshooyinka loo fidiyo adeegyada ay u baahanyihiin si ay wax uga soo saartaan beeraha iyo xoolaha. | Dokumentiga Qiimaynta Mashruuca |
| Su'aal hoosaad1.3- Unugga Hirgelinta Mashruuca ma hubiyay in dhammaan ilo biyoodyada la dhisay ama la dayactiray ay ahaayeen kuwo tayo wanaagsan leh? | Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) | Faahfaahinta Shuruudaha; Qandaraaska la bixiyay (BOQ) |
| Su'aasha baaritaanka 2- Unugga Hirgelinta Mashruuca ee Wasaaradda heer Federaal, si hufan ma u maareyay horumarinta ilo-biyoodyo badan iyo taageerada beeraha iyo xoolaha? | | |
| Su'aal-hoosaad2.1- Markii la joogay marxaladda qorsheynta, sidee buu Unugga Hirgelinta Mashruuca u hubisaagoobaha laga dhisayo ama ladayactirayo ilo biyoodyada? | Marka la eego Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM), fulinta hawlaha muhiimka ah ee horumarinta ilo-biyoodyo badan waxaa ka mid ah shaqaaleysiinta la taliyaal injineerro ah si ay gacan uga siiyaan PIU-yada nidaamka xulashada goobta iyo kormeerka dhismaha ilaha biyaha si dawlad kasta oo ka qeyb ka ah mashruucan ay u sameyso daraasad | Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM) |

| | | |
|---|--|--|
| | iyo qorshe maal gelin iyada u gaar ah. | |
| Su'aal-hoosaad2.2- Unugga Hirgelinta Mashruuca ma hubiyay dhamaystirka dhammaan ilo biyoodyada loo qorsheeyay dhismaha iyo dayactirka, haddana ma yihiin kuwo shaqaeynaya? | Sida ku cad liiska uu soo saaray Unugga Hirgelinta Mashruuca, 45 ilo biyood ayaa loo qorsheeyay in la dhiso halka 15-na qorshuhu ahaa in la dayactiro. | Qorsha hawleedka uu soo gudbiyay Unugga Hirgelinta Mashruuca |
| Su'aal hoosaad2.3- Unugga Hirgelinta Mashruuca ma hubiyay in hawlaha khuseeya beeraha iyo xoolaha loo fuliyay si waafaqsan qorshaha? | Sida ku cad Dukumintiga Qiimeynta Mashruuca (PAD), hawlaha hoos yimaada taakuleynta beeraha iyo xoolaha waxaa ka mid ah samaynta beero bulsho iyo geed miroodyo (loo isticmaalayo qaab waxbarid iyo tusaaleyn); soo iibin iyo qaybinta abuurka la hagaajiyay iyo agabyada kale; iyo hirgelinta waraabka-yar ee waxtarka sare leh, qiimaynta heerka nafaqada ciidda, iyo tababarka loo baahan yahay ee diiradda saaraya kor u qaadida xirfadaha beeralayda ee uguuridda qaab beerashada la jaan-qaadi karta cimilada. | Dukumintiga Qiimeynta Mashruuca (PAD) |

2.3.Baaxadda iyo Xuduudaha Baarista

Baarista waxaa diiradda lagu saaray sidii loo qiimayn lahaa waxqabadka iyo waxtarka ilo biyoodyada la dhiso iyo kuwa dib loo dayactiray iyo sidoo kale hawlaha taakuleynta beeraha iyo xoolaha ee lagu hirgaliyay mashruuca BIYOOLE oo uu hirgaliyay Unugga Hirgelinta Mashruuca ee hoos yimaada Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha. Baarista ayaa si gaar ah diiradda u saaray maamul goboleedyada Puntland, Galmudug iyo Koonfur Galbeed oo hawlahaasi laga soo qabtay. Hawlaha la qiimeeyay ayaa la hirgaliyay sannadaha 2020 ilaa 2023, oo ah wakhtiga loo qabtay hirgelinta mashruuca.

26 ka mid ah 46 ilo biyood ee la dhiso ama la dayactiray ayaa la booqday si loo soo hubiyo. 4 waxay ka mid ahaayeen 11 goobood oo ku yaal Galmudug, 13-na waxay ka mid ahaayeen 23 goobood oo ku yaal Puntland, Halka 9 kalena ay ka mid ahaayeen

12 ku yaal Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed. Intii lagu guda jiray qeybtii ugu ballaarneyd ee baarista, kooxda baarista ayaa ku guuleystay in ay booqdaan 7 goobood oo 3 ka mid ah ay ku yaalaan Dowlad Goboleedka Galmudug, halka 4 ka mid ah ay ku yaalaan Koonfur Galbeed. Si kastaba ha ahaatee, kooxdan uma suurtagelin in ay booqdaan dhammaan 13-kii goobood ee laga soo xulay Puntland, sababo la xiriira arrimo siyaasadeed oo u dhexeeya dowlad goboleedka Puntland iyo dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya. Intaa waxaa dheer, xaalado nabad gelyo darro ayaa hor istaagay in la tago goobihii kale ee la xushay ee ka haray Galmudug iyo Koonfur Galbeed.

2.4.Hababka Xog-Aruurinta

Kooxda Hantidhowrku waxay adeegsadeen saddex hab xog ururin oo waaweyn oo kala ah, dib-u-eegista dokumentiyada, waraysiyada, iyo kormeerka goobta. Hababkan ayaa hoos lagu faahfaahiyay.

2.4.1. Dib-u-eegista dokumentiyada

Kooxda baaristuu waxay dib u eegis ku sameeyeen dukumentiyada kala duwan si ay u fahmaan mashruuca una dejiyaan halbeegyada iyo macluumaadka kale ee hagi doona fulinta barista hantidhowrka. Heerka Unugga Hirgelinta Mashruuca, dukumeentiyada ay ka mid yihiin heshiisyada maaliyadeed, dukumeentiga qiimaynta mashruuca, hagaha hawlaha mashruuca, warbixinnada kormeerka iyo qiimeynta, warbixinnada horumarka, iyo qorshayaasha hawlaha ayaa dib u eegis lagu sameeyay. *Shaxda 2.4.1 ee lifaaqa I waxay ku tusaysaa liiska dukumeentiyada dib-loo-eegay iyo u jeeddada gaarka.*

2.4.2. Wareysi

Si loo helo macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan hirgelinta mashruuca, waxaa wareysiyo laga qaaday daneeyayaal muhiim ah oo ka mid ah kooxda maamulka mashruuca iyo qaar ka mid ah ka faa'iidaystayaasha. Wareysiyadan waxay ujeeddoodu ahayd in lagu qiimeeyo waxqabadka mashruuca, laguna caddeeyo natiijooyinka, iyo xaqiijinta xogta ku jirtay warbixinnada mashruuca. Dadka la waraystay waxa ka mid ahaa isuduwaha mashaariicda ee heer qaran, u-qeybsanaha maaliyadda, u-qeybsanaha iibka, u-qeybsanaha daba-galka iyo qiimaynta, injineerka mashruuca, iyo guddoomiyihii ugu dambeeyay ee guddiga hagidda mashruuca. Intii lagu guda jiray booqashooyinka goobaha, kooxda hantidhowrku waxay sidoo kale la fariisteen ka-faa'iidaystayaasha mashruuca si ay u qiimeeyaan waxyaabaha hagaagay tan iyo intii la hirgeliyay mashruuca. *Shaxda 2.4.2 ee Lifaaqa II ee daneeyayaasha la waraystay.*

2.4.3. Kormeerka goobaha

Kooxda barista waxqabadku waxay booqdeen goobaha taa oo qeyb ka ahayd qiimynta guud iyagoo si gaar ah diiradda u saaray goobo ku yaal Galmudug iyo Koonfur Galbeed. Xulashada goobaha la booqday ayaa lagu saleeyay sahalka lagu tegi karo iyo heerka khataraha amniga ee ka jira. Habkan cilmiyeysan ayaa la adeegsaday si loo xaqiijiyo jiritaanka, iyo shaqaynta ilo biyoodyada iyo hawlaha beeraha la xiriira ee laga dhisay goobahan. Booqashada goobahan ayay kooxda hantidhowrku uga gol lahayd inay ku soo ururiyaan caddeymo hubinaya saxnaanta natiijooyinka ay soo saareen ee ku saabsan hirgelinta ilo biyoodyo badan iyo qeybaha la xiriira horumarinta beeraha iyo xoolo dhaqashada. Kooxda ayay u suurta geli weysay inay booqdaan dhammaan goobihii laga soo xulay Puntland, sababo la xiriira arrimo siyaasadeed oo u dhexeeya Puntland iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya. Intaa waxaa dheer, welwel amni oo hor istaagay in la booqdo qaar ka mid ah goobihii ku yaallay maamullada Galmudug iyo Koonfur Galbeed. *Shaxda 2.4.3 ee Lifaaqa III waxay tilmaamaysaa goobihii la booqday.*

2.5.Heerarka Baarista

Waxaan baaristan u fulinnay si waafaqsan Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Guud (ISSAI), ee khuseeya baarista waxqabadka.

Heerarkani wuxuu lagama maarmaan ka dhigayaa in barista loo qorsheeyo loona sameeyo si lagu heli karo caddaymo ku filan oo ku habboon oo saldhig maangal ah u noqon kara natiijooyinka iyo gunaanadka baarista ee ku salaysan ujeedooyinka hantidhowrka.

CUTUBKA SEDAXAAD: TILMAANTA MAJAALKA BAARISTA

Cutubkani waxa uu sharraxaad guud ka bixinayaa majaalka barista, sharciyadooda, ujeedooyinka, qaab-dhismeedka, doorka iyo masuuliyadaha daneeyeyaasha muhiimka ah ee ku lugta leh hirgelinta mashruuca, nidaamyada iyo hab-socodka iyo hannaanka maaliyadda ee majaalka baarista.

3.1.Sharraxaad Guud

Mashruuca Biyaha, Waxsoosaarka iyo Adkeysiga Beeraha iyo Xoolo-dhaqashada (Biyoole), waxaa loogu talagalay in lagu horumariyo adeegyada biyaha iyo beeraha ee bulshooyinka xoola dhaqatada iyo beeraleyda ah ee ku nool dhulka engegan ee Soomaaliya. Mashruuca waxaa la ansixiyay 25^{ka} Juun, 2019, waxaana la soo gabagabeeyey 28^{ka} Febraayo, 2023. Bangiga Adduunka ayaa mashruuca ku maalgeliyay \$42 milyan. Unugga Hirgelinta Mashruuca ee hoos yimaada Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa ahayd cidda masuulka ka ah isku xirka mashruuca heer qaran iyo kormeerka fulinta mashruuca. Wasaaradaha ugu muhiimsan ee qeybta ka ahaa guddiga hagidda mashruuca waxaa ka mid ah, Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka, Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha, Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, iyo Agaasinka Deegaanka ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

Waxyaabaha muhiimka ah ee mashruucu in laga helo ay ahayd waxaa ka mid ahaa:

- Horumarinta ilo-biyoodyo looga faa'iideysan karo siyaabaha kala duwan.

Waxaa ka mid ahaa kaabayaasha maareynta biyaha sida biya xireenka, keydinta, iyo gaarsiinta biyaha ee dadka, xoolaha iyo waraabinta beeraha. Kaabayaashan ayay ahayd in loo naqshadeeyo si ay gacan uga geystaan horumarinta caafimaadka aadanaha iyo biyaha loo isticmaalo waxsoosaarka (gaar ahaan wax soo saarka beeraha iyo adeegyada kulmiya beeraha iyo kaymaha ee looga gol leeyahay in dib loogu nooleeyo deegaanka iyo muuqalkiisa), si bulshooyinka mashruuca loogu tala galay u noqdaan kuwo u adkeysan kara abaaraha iyo daadadka.

- Taakulada Beeraha iyo Xoolaha

Taakulada beeraleyda iyo xoola dhaqatada waxaa soo hoos galaya horumarinta, isku dhafka iyo ballaarinta tabaha nolosha ee bulshada loogu talagalay mashruuca. Waxay ahayd in la fududeeyo bixinta agabka beeraha ee loo baahan yahay iyo fidinta adeegyada bulshooyinku u baahan yihiin iyada oo la tix gelinayo baahiyaha bulshooyinka iyo waxyaabaha hortabinta u leh oo ay ka mid yihiin qiyaasta helitaanka iyo isticmaalka biyaha. Hawlaha hoos yimaada qayb-hoosaadkan waxaa ka mid ah samaynta beero bulsho iyo geed miroodyo (loo isticmaalayo qaab waxbarid iyo tusaaleyn); soo iibinta iyo qaybinta abuurka la hagaajiyay iyo agabka kale; iyo hirgelinta hababka waraabka-yar ee waxtarka sare leh, qiimaynta heerka nafaqo ee

ciidda, iyo tababarrada loo baahan yahay. Maalgelintan waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo bulshada in ay kordhiyaan wax soo saarkooda cunto nafaqo badan oo ay reeruhu isticmaalaan, iyo hadii ay suurta gal tahay suuq geynta wax soo saarka dheeraadka ah. Tababarka ayaa diiradda saarayay kor u qaadida xirfadaha beeralayda ee u guuridda qaab beerashada la jaan-qaadi karta cimilada.


3.2.Sharciyadda

Sharciyadda waxaa laga soo dhiraandhiriyay heshiiska maaliyadeed ee u dhexeeya Bangiga Adduunka iyo Dowladda Soomaaliya (waxaa ku jira heshiisyada dhaqaale kabka ee dowlad goboleedyada), Dukumeentiga qiimaynta mashruuca iyo Buug-yaraha Hawlaha Mashruuca.

3.3.Ujeeddooyinka

Sida ku cad Dukumentiga Qiimaynta Mashruuca, Buug-yaraha Hawlaha Mashruuca, Ujeeddada Hirgelinta Mashruuca (PDO) waxay ahayd "in la horumariyo adeegyada biyaha iyo beeraha ee bulshooyinka beeraleyda-xoolo dhaqatada ah ee ku nool dhulka engegan ee Soomaaliya".

3.4.Qaab-dhismeedka Maamul



3.4.1. Doorarka iyo masuuliyadaha daneeyeyaasha muhiimka ah ee ku lugta lahaa hirgelinta mashruuca

1. Heer Federaal

a. Guddiga Hagidda ee Wasaaradaha

Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha waxaa ka mid ah:

- Inay si meerta ah u guddoomiyaan Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha, Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka, Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa iyo Agaasinka Deegaanka ee Xafiiska Ra’iisul Wasaaraha kulamadooda oo qabsoomayay3-dii biloodba mar;
- Dib-u-eegista iyo ansixinta qorsha hawleedka sanadlaha ah iyo miisaaniyad sanadeedka;
- Dib-u-eegista warbixinnada saddex biloodlaha ee mashruuca iyo hagidda istiraatiijiyadeed;
- Fududeynta wadahaadalka wasaaradaha dhexdooda ah iyo kan Dowlad Goboleedyada iyo ka tala bixinta arrimaha soo kordha inta lagu jiro hirginta mashruuca;
- La socodka Dabagalka iyo Qiimeynta mashruuca;
- Xaqiijinta aasaasidda iyo ka shaqeysiinta qaab-dhismeedka maamul ee mashruuca dhammaan heerarkiisa kala duwan; iyo
- Hubinta in habka hirginta mashruuca loo cusbooneysiyo si joogto ah.

b. Wasaaradda Maaliyada

Waajibaadka iyo mas’uuliyadaha waxaa ka mid ahaa:

- Maamulida miisaaniyadda mashruuca iyo hubinta sii-deynta dhammaan kharashyada mashruuca; iyo
- Isu-duwidda iyo ururinta warbixinnada maaliyadeed ee mashruuca.

c. Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha

Waajibaadka iyo mas’uuliyadaha waxaa ka mid ahaa:

- Isu-duwidda hirginta mashruuca dhammaan heerarkiisa kala duwan;
- Marti-gelinta isu-duwidda mashruuca;
- Korjoogteynta qeybaha Dabagalka iyo Qiimeynta ee mashruuca;
- Horumarinta Istiraatiijiyada xiriirka iyo wadashaqeynta ee Mashruuca;
- Joogteynta xiriir adag oo lala yeesho wakaaladaha fulinta mashruuca ee heer federaal iyo kuwa dowlad goboleedyada si loo ururiyo macluumaadka la xiriira mashruuca;
- In si joogta ah loo cusbooneysiyo qaabka maamulka natiijooyinka mashruuca.
- Diyaarinta warbixinnada sedax biloodlaha, kuwa lix biloodlaha iyo kuwa sanadlaha ah ee ku saabsan heerka mashruuca marayo.

d. Hay’adaha Fulinta ee Heer Federaal

Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka, Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha, Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, iyo Agaasinka Deegaanka ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, waxay lahaayeen waajibaad ay ka mid ahaayeen:

- In ay siiyaan taageero farsamo iyo matelaad hay'adaha hirgelinta mashruuca ee heer Dowlad Goboleed;
- In ay tababaro iyo hagitaan siiyaan hay'adaha hirgelinta mashruuca ee heer Dowlad Goboleed;
- In ay hagaajiyaan siyaasadaha, xeeladaha, hab-raacyada iyo buug-yaraha shaqada ee meelaha ay khusayso.

2. Heer Dowlad Goboleed

a. Unugyada Hirgelinta Mashruuca Dowlad-goboleedka (PIU) (Galmudug, Puntland iyo Koonfur-galbeed)

Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha waxaa ka mid ah:

- Qorsheynta, miisaaniyad u dejinta, hirgelinta, kormeeridda iyo qiimeynta dhammaan hawlaha la xiriira mashruuca ee dowlad goboleedkooda;
- Maareynta heshiisyada adeegga (hay'adaha abaabulka bulshada, qiimeynta biyaha, iyo sahanka injineeriyada);
- Soo iibinta dhammaan badeecooyinka (qalabka xafiiska, baabuurta, abuurka la hagaajiyay);
- Maareynta heshiisyada hawlaha guud (hay'adaha adeegga farsamada, kaabayaasha biyaha, beeraha bulshada ee loo isticmaalo tusaaleynta iyo geed miroodyada, adeegyada daaweynta xoolaha iyo kuwo kale);
- In si dhow loola shaqeeyo hoggaamiyaasha bulshada iyo deegaanka;
- In la diyaariyo oo loo gudbiyo codsi miisaaniyad kalle ah Wasaaradda Maaliyadda;
- Bixinta lacagaha la siiyo adeeg bixiyayaasha, la taliyayaasha, qandaraaslayaasha iyo kuwa kale;
- Joogteynta xiriirka ay la leeyihiin wasaaradaha dhiggooda ee heer Federaal, si ay uga helaan taageero farsamo iyo talo haboon; iyo
- Soo aruurinta macluumaadka la xiriira mashruuca, isku duwidada iyo diyaarinta warbixinnada ku saabsan heerka uu joogo hirgelinta mashruuca.

b. Guddiga Horumarinta Deegaanka

Guudmar

- Xubinnimada VDC waxay ka koobneyd dhammaan xubnaha bulshada ee sida rasmiga u degan deegaanka.

- Haddii ay jiraan dad gudaha ku barakacay oo bulshada dhexdeeda ah, waxaa lagu taliyay in ya ka qeyb qaataan qorsheynta si loo yareeyo khilaafaadka ka dhasha ka faa'iideysiga kheyraadka.
- Guddigu oo uu hoggaaminayo guddoomiyuhu, wuxuu ka koobnaa 7 xubnood oo ugu yaraan 30% ay yihiin haween.

Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha waxaa ka mid ah:

- Abaabulka bulshada si ay si buuxda uga qaybqaataan dhammaan hawlaha mashruuca ee heer bulsho;
- Fududeynta qabsoomida doodaha heer bulsho, qiimeynta deg dega ee dhulka baadiyaha, indha-indheynta qotada dheer ee dhulka, iyo kuwa kale;
- Korjoogteynta diyaarinta qorshayaasha horumarinta bulshada;
- Fududeynta ka qeyb galka bulshada ee mashruuca iyo inay wax ku biiriyaan (shaqaale, agab, iyo waxyaabo kale)
- Fududeynta iyo abaabulidda tababaro heer bulsho (oo ku saabsan maareynta arrimaha bulshada, dayactirka hawlgalka, jinsiga, maareynta kheyraadka dabiiciga, xallinta khilaafaadka iyo kuwa kale);
- La soo wareegidda, lahaanshaha, maamulidda, iyo hawl-gelinta kaabayaasha bulsho;
- La xiriiridda PIU-da heer Dowlad Goboleed iyo wasaaradaha ay khusayso si loo taageero farsamo iyo taageeradii kale ee loo baahdo;
- Uruurinta iyo u gudbinta PIU heer dowlad goboleed macluumaadka la xiriira mashruuca.

3.5 Nidaamka iyo Hannaanka

Jaantusyada hoose waxay muujinayaan hababka la isticmaalay si loo horumariyo ilo-biyoodyo, iyo sidoo kale hawlaha beeraha iyo xoolaha.

i. Hormarinta Ilo-biyoodyo Badan:

1

Hawl-geinta iyo awood siinta PIU-da

Samee Unugga Hirgelinta Mashruuca si uu u kormeero fulinta iyo maamulka mashruuca.

2

La heshii oo hawl-geli Injineero la taliyaal ah

Xulo oo la macaamil injineero bixiya talo iyo taageero

3

Xulo baraha hirgelinta oo samee daraasadda suurta-galnimada

Cayin baraha suurtagalka ah adiga oo qiimeenaya ku habboonaantooda horumarinta kaabayaasha biyaha.

4

Qiimee habboonaanta goobta keydina natiijada qiimeynta

Qiimee arrimo ay ka mid yiin muuqaalka iyo qaabdhismeedka dhulka, ciidda, iyo helitaanka biyaha, si looga go'aan gaaro haboonaanta goobta.

5

Qiimeynta goobaha ee Bangiga Adduunka ee booqashada ama tignooligiyada

Bangiga Adduunka ayaa dib u eegis ku sameynaya goobaha la soo jeediyay, ha ahaato booqashooyin toos ah ama iyada oo la isticmaalayo tignoolajiyada.

6

Koox hawleedka oo bixisa "oggolaansho"

Bangiga Adduunka ayaa dib u eegis ku sameynaya goobaha la soo jeediyay, ha ahaato booqashooyin toos ah ama iyada oo la isticmaalayo tignoolajiyada ka dibna bixiya oggolaansho.

7

Kala hadal wakiillada bulshada hawlaha mashruuca

Ka qeyb-geli oo kaasho hoggamiyaasha bulshada si wax looga qabto tabashooyinka

8

Qiyaas heerka jiritaanka biyaha oo wargeli bulshada

Qiimee heerka jiritaanka biyaha ee la saadaaliyay iyadoo lagu salaynayo tignoolajiyada biyaha ee qorshaysan kana qeyb geli bulshada qorsheynta isticmaalka biyaha.

9

Samee daraasaadka suurtoganimada goobaha iyo qorshayaasha maalgashiga

Samee daraasado faahfaahsan oo samee qorshayaasha maalgashiga ee goob kasta.

10

Diyaari tilmaamaha, hindisaha, & bixinta qandaraasyada

Maamul habka wax iibsiga ee hawlaha dhismaha ee goobaha la doortay si waafaqsan qorshayaasha mashruuca.

11

Dhisidda biyo-xireennada iyo kaabayaasha la xiriira

Ka hirgeli hawlaha dhismaha goobaha la doortay oo ay ku jiraan dhismaha biya xireenada iyo hawlaha guud ee la xiriira.

12

Dejinta iyo fulinta qorshaha maamulka qandaraasyada

Dejinta habraacyada maaraynta qandaraasyada iyo in la hubiyo u hoggaansanaanta hab-raaca iibka ee Bangiga Adduunka.

13

Kormeer hawlaha dhismaha

La soco oo kormeer habka dhismaha si loo hubiyo tayada iyo u hoggaansanaanta shuruudaha.

14

Kormeer shaqeynta kaabayaasha la dhisay

Si joogto ah u qiimee waxqabadka iyo shaqaynta kaabayaasha biyaha dhismaha ka dib.

ii. Taageerada Beeraha iyo Xoolaha :

1 La heshii hay'adaha aan dawliga ahayn ama kuwa Qaramada Midoobay iyada oo ay korjoogteynayaan shaqaalaha maxalliga ee wasaaradda beeraha si loo dhiso beero tusaale ah iyo kaabayaasha kale ee tababarada.

2 Soo iibi oo qeybi, iyada oo la marayo hay'adaha qandaraaska la siiyay agabka abuurka, qalabka waraabka, qalabka lagu baaro ciidda iyada oo mudnaan la siinayo abuurka tayadiisa la xaqiijiyay oo laga qaadanayo alaab-qeybiyeyasha maxalliga ah, halka ay suurtagal tahay.

3 Sii beeraleyda tababarro ku saabsan beerashada miro cayiman & teknoolojiyada CSA waana inay hogaamiyaan shaqaalaha dowlad goboleedka & kuwa maxalliga ah ee Wasaaradda Beeraha, oo taageero ka helaya Hay'ad QM/hay'ad maxali ah.

4 In beeralayda la siiyo tababaro loo marinayo qandaraasyada agabka/adeeg bixiyayaasha, iyadoo Wasaaradda Beeraha ku kormeereyso isticmaalka iyo maaraynta hababka waraabka-yar.

5 In lagu tababaro beeralayda wax-soo-saarka calafka iyo kaydinta iyadoo loo marinayo hay'adaha aan dawliga ahayn ama kuwa QM ayna kormeerayaan Wasaaradaha Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha.

6 In beeralayda la siiyo tababar ku saabsan hababka kaydinta miraha abuurka iyo dhisida kaabayaasha keydka qoyska iyo bulshada.

7 Tababarka Shaqaalaha Caafimaadka Xoolaha ee Bulshada (CAHWs) iyo soo iibinta agabka/qalabka loo baahan yahay.

8 La soco hawlaha si loo hubiyo Tayada, qiimee oo diiwaangeli saamaynta

3.6 Funding Structure of the Audited Area

| Faahfaahinta Hawsha | Miisaaniyadda La Qoondeeyay | Miisaaniyadda Dhabta |
|--------------------------------|-----------------------------|----------------------|
| Hirgelinta ilo biyoodyo badan | \$15 milyan | \$8.5 milyan |
| Taageerada beeraha iyo xoolaha | \$6 milyan | \$6 milyan |
| Wadarta | | \$14.5 milyan |

CUTUBKA AFRAAD: NATIIJOOYINKA, GUNAANADYADA IYO TALOOYINKA

Cutubkani waxa uu soo bandhigayaa natiijadii baaritaanka ee la helay intii lagu jiray barista waxqabadka, iyada oo lagu lafo-guray in PIU-da qaranku ay ku guulaysteen hirgelinta ilo-biyoodyo badan iyo hawlaha taakulaynta beeraha iyo xoolaha si ay uga qaybqaataan ujeedooyinka guud ee mashruuca, kuwaas oo ahaa fulinta adeegyada biyaha iyo beeraha ee bulshooyinka beeraleyda-xoolo dhaqatada ah ee ku nool dhulka engegan ee Soomaaliya. Gunaanadka natiijooyinka ayaa lagu soo bandhigay iyadoo sidoo kale talooyin loo soo jeediyay hay'addala baaray si ay waxqabadkooda u hagaajiyaan.

4.1 Ceel biyood la dayactiray oo si fiican u shaqeynaya

Sida ku cad faahfaahinta shuruudaha (BOQ) ee qandaraaska lagula galay iibiyaha, agabka guud ee loo tixgalinayo dayactirka ceelka waxaa ka mid ahaa haan biyood cusub oo meel sare saaran, agabka ceelasha, rakibaadda soolarka, qolka matoorrada & qolka hawl-wadeenada, dhismaha kaydka biyaha iyo barkadaha xoolaha laga waraabiyo.

Intii ay baarista ku jireen ayay kooxda hantidhowrku waxay ogaadeen in dib u dayactir lagu sameeyay ceel biyood la dhisay sanadkii 1991-kii si dib looga shaqeysiiyo kaas oo ku yaal deegaanka Afuugdi ee dowlad goboleedka Koonfur Galbeed. Waxaa la ogaaday in ceel biyoodku uu si hufan u shaqaynayay, lagana helayay biyo tayo sare leh oo ku habboon isticmaalka gurayaha iyo kuwa kaleba. Agabka biyaha ka soo saara ceelka ayaa la hirgeliyay, kaas oo ka qeyb qaadanayay habsami u socodka shaqada ceelka. Goob biyood leh 6 tubo ayaa loo dhisay bulshada, dadkuna ay si joogto ah u isticmaalayaan. Barkadaha waraabka xoolaha oo loo qaabeeyey si waafaqsan Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) ayaa loo dhisay geela, lo'da, riyaha iyo idaha. Berkadahan ayaa sidii loogu talo galay loo isticmaalayey. Xaaladda qolkawaardiyaha ayaa la xaqiijiyay inay wanaagsan tahay. matoor, oo ay ku jiraan kuwa soolarka ah, ayaa jiray oo la isticmaalay si loo taageero socodka biyaha si wax ku ool ah.

Biyo nadiif ah oo ku jira Barkadda Xoolaha ee Afuugdi Koonfur Galbeed



Gunaanad

Gunaanadkii, ceel biyoodka la dayactiray ayaa la ogaaday inuu yahay mid waari kara, si wax ku ool ahna u dabooli kara baahida xoolaha iyo dadka deegaanka.

Talooyin

Kadib markii lagu guuleystay dayactirka ceelka tuulada Afuugdi ee degmada Baydhabo ee dowlad goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya, waxaa loo soo jeedinayaa Unugga Hirgelinta Mashruuca in ay si joogta ah u gutaan waajibaadkooda, si la mid ahna ugu dadaalaan howlaha kale ee la midka ah mustaqbalka, si ay ugu adeegaan danaha iyo samaha muwaadiniinta nugal.



4.2 Biyo xireennada aan shaqaynayn, U hogaansami la'aanta Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) iyo Agab maqan

Sida ku cad Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) ee qandaraaska dhismaha biya xireennada Koonfur Galbeed iyo Galmudug lagu bixiyay, qaybaha biyo-qabadyada ee la dhisay waxaa ka mid ah dib-u-soo-celinta Balley ama dhismaha Haffir, banka biyaha iyo daweynta biyaha ee UV., Hal Haan Biyood (32 Cubic Miter), dhismaha 1 Goob biyood oo leh 6 tubo, dhismaha barkadaha waraabka xoolaha, geela, lo'da, riyaha iyo idaha, dhismaha qoluu dego waardiye, iyo bixinta Koronto-dhaliyeyaasha (oo ay ku jiraan Korontada laga Dhaliyo Cadceeda ee Nidaamka PV). Tilmaamaha ku cadaa faahfaahinta shuruudaha (BOQ) ee dib-u-soo-celinta hal ceel oo Balley ku yaal waxay ahaayeen sida soo socda:

- Dhismaha laba kanaal oo biyo-mareeno oo cabirkoodu yahay 50x3mx50cm iyo 55x3m50cm iyada oo la isticmaalayo mashiino;
- Buuxinta adag ee hore loo ansixiyay oo ay la socoto fidin hagaagsan si ay u daboolo hareeraha biyo-xireenka Haffir;
- Ku rakibida qashin celiyaha afka hore ee haanta biyaha kaa oo awood u leh inuu celiyo qashinka waaweyn; iyo
- Keenista iyo rakibida deyr ugu yaraan jooggiisu yahay 2.00m.


4.2.1 Intii uu socday baaritaanka, waxaa la ogaaday, inkastoo lacag dhan \$140,500.53 doolar lagu bixiyay dhismaha biyo qabad ee deegaanka **Warmakiinaay ee dowlad goboleedka Koonfur Galbeed**, haddana waxaa jiray cillado xooggan. Booqashadii waxaa lagu ogaaday in biya xireenku uusan shaqaynayn oo engegan yahay, oo

uusanna buuxin shuruudaha lagama maarmaanka ah ee ku qeexan qandaraaska. Kooxda hantidhowrku waxay ogaadeen in hal kanaal biyood la dhisay halkii laba looga baahnaa, aasaaska darbiga biya xireenkana uusan gaarsiisneyn adeygii loo baahnaa. Intaa waxaa dheer, dhismuhu kuma jiraan qashin celiyaha joogtada iyo xayndaabka lagu qeexay faahfaahinta shuruudaha (BOQ) iyo qaybaha muhiimka ah sida koronto-dhaliye (oo ay ku jiraan nidaamka soolarka ee PV), qalabka biyaha soo saara, iyo daaweynta biyaha ee UV ayaa ka maqnaa goobta inkastoo qandaraaslaha lacagtooda la siiyay. Gaabisyadan waxay muujinayaan in aad looga leexday qorshihii la ansixiyay taa oo keentay in hanti badan khasaarto.

| | |
|---|--|
| <p><i>Biyo qabad aan shaqaynayn oo ay ka maqan tahay deyrka ku xeeran iyo biye celiye munaasib ah</i></p> | <p><i>Hal kanaal biyo ah oo aan lahayn qashin celiye joogto ah</i></p> |
|  |  |
| <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 17-kii Maarso 2024</i></p> | <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 17-kii Maarso 2024</i></p> |

4.2.2 Inkastoo lacag dhan **\$162,959.92** lagu kharash gareeyay dhisidda goobta biyaha Awdiinle1 ee dowlad goboleedka Koonfur Galbeed, baaritaankii la sameeyay waxa uu daaha ka qaaday khaladaad waaweyn oo ku yimid fulinta mashruuca. Biyo-xireenka la dhisay ayaa ahaa mid tayadiisu aad u liidato, isagoo aan buuxin tilmaamaha ku qeexan Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) ee dib u qodista Balley. Baaarista ayaa lagu ogaaday in biya celiyaha aan loo dhisin si munaasib ah uuna ahaa mid aasaaskiisu jilicsan yahay. Intaa waxaa dheer, qayb muhiim ah oo ka mid ah xayndaabku waa duntay iyadoo ay ugu wacan tahay isticmaalka biro tayadoodu liidato, sida ka muuqatay ayna qireen xubnaha bulshada. Kanaalka biyaha keena wuxuu ahaa mid aan waxtar lahayn, burburay, oo aan lahayn aasaas sax ah, halka kan biyaha saarana aanba la dhisin. Matoorka (oo ay ku jiraan kuwa soolarka) iyo baallayaasha soolarka ee la geeyey goobta lama rakibin, bamka biyuhuna ma shaqeyneyn, tan oo dhaawacday qulqulkabiyaha ee haanta iyo guud ahaan waxtarka nidaamka biyaha. Inkasta oo lacagta la siiyay qandaraaslaha ay ku jirto kharashka nidaamka nadiifinta biyaha, lama hirgelin nidaamka sifeynta biyaha si loo hubiyo nadaafadda biyaha iyo badqabka. Taa oo keentay, in goobaha biyaha laga dhaansado iyo baraagaha xoolaha ay noqdeen kuwo aan la isticmaalin, taas oo ku qasabtay

bulshada iyo xoolahaba in ay si toos ah uga cabbaan biyo aan la sifeyn nadiifna ahayn biyo xireenka.



| | |
|---|--|
| Biya xireenka laga dhisay Awdiinle I, Koonfur Galbeed | Deyrka dunsan ee biya xireenka Awdiinle 1 Koonfur Galbeed |
|  |  |
| <i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 18-kii Maarso 2024</i> | <i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 18-kii Maarso 2024</i> |

| | |
|---|--|
| Kanaal biyo oo aan wax tar lahayn aasaaskiisuna liito oo laga dhisay Awdiinle 1 Dam | Qalabka soolarka oo aan la rakibin oo lagu arkay bakhaar ku yaal biyo xireenka Aqdiinle 1. |
|  |  |
| <i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 18-kii Maarso 2024</i> | <i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 18-kii Maarso 2024</i> |

4.2.3 Biyo-xireenka laga dhisay deegaanka Awdiinle 2 ee dowlad goboleedka Koonfur Galbeed, oo ku kacay **\$157,101.72**. Si kastaba ha ahaatee, intii lagu jiray baaritaanka, kooxdu waxay xaqiijiyeen in shuruudo badan oo gaar ah oo lagu qeexay Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) dib-u-qodista Balley aan la buuxin. Gaar ahaan, xayndaabka ku xeeran biyo-xireenka ayaa ahaa mid aan dhamaystirnayn oo tayadiisu liidato, dhismaha biya celiyuhuna waxa uu ahaa mid tayadiisu liidato maadaama aasaaskiisu aanu adkeyn. Aasaaska kanaalka biyuhu wuxuu u muuqday mid daciif ah waxaana ka muuqday burbur aad u daran, oo ay ku jiraan dildilaacyo waxayna tani keentay in marinkii biyaha loogu talagalay uu xiro qashin burbur ah sida carro, bacaad iyo dhagxaan. Arrin kale oo xusid mudan ayaa ahayd maqnaanshaha nidaamka daaweynta iyo sifeynta biyaha ee UV taasoo meesha ka saartay in laga helo biyo nadiif

ah inkastoo qandaraaslaha la siiyay lacagta nidaamka sifaynta. Waxaa kaloo la ogaaday gaabis ka jiray dhanka bambada biyaha, sidoo kale, tubooyinka biyaha qaadaya oo gaaban dartood biyuhu ma gaari karin bartamaha biya xireenka, taasoo hoos u dhigtay waxtarka qulqulkabiyaha ee haanta.

| | |
|---|---|
| <p>Kanaalka biyaha Awdiinle 2, oo burburay, xirmayna aasaaskiisuna liito</p> | <p>Biyo xireenka Awdiinle 2 oo leh deyr aan dhamaystirnayn iyo biyeceliye liita</p> |
|  |  |
| <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG, Sawirka la qaaday 18-kii Maarso 2024</i></p> | <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG, Sawirka la qaaday 18-kii Maarso 2024</i></p> |

| | |
|--|--|
| <p>Bamka biya xireenka Awdiinle 2 oo leh tubooyin gaagaaban</p> | <p>Biyo aan nadiif ahayn oo ku jira barkadda xoolaha ee Awdiinle 2</p> |
|  |  |
| <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 18-kii Maarso 2024</i></p> | <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 18-kii Maarso 2024</i></p> |



4.2.4 Biyo xireenka Haffir oo ay ku baxday lacag dhan \$145,571.384 ayaa laga dhisay Dibiyalaay oo ku taalla dowlada goboleedka Galmudug. Intii ay booqashada goobta ku jireen kooxda hantidhowrku, waxay ogaadeen, in biyo xireenka la dhisay uu ahaa mid aan shaqaynayn. Biyo-xireenkuna ma celin karin biyaha sababo la xiriiraa dhismaha oo aan si fiican loo qorsheyn. Kanaalka biyaha ayaa meela khaldan laga dhisay, taasina waxay saamaysay qulqulka biyaha ee biya xireenka. Haraadiga burburka sida ciidda iyo dhagxaanta oo la dhigay hareeraha marinkii loogu talagalay biyaha, ayaa caqabad ku noqday qulqulka biyaha. Waxa intaa dheer sida ay sheegeen masuulka iyo xubnaha kale ee bulshada, in biya xireenka bacdiisu ay dillaacday, taas oo sababtay in biyihii galay xilligii roobka ay dhulka u sii dusaan. Arrintan ayaa keentay in biya xireenku uu keydin kari waayo biyaha si loo isticmaalo mustaqabalka. Waxaa intaa dheer, qaybaha muhiimka ah ee lagama maarmaanka u ah nadiifinta iyo qaybinta biyaha, oo ay ku jiraan nidaamka daaweynta biyaha ee UV, bamka biyaha, iyo matoorka, lama rakibin inkastoo goobta la geeyey. Sidaa darteed, bulshadu kama faa'iidaysan biyo-xireenka loo dhisay si loo yareeyo saameynta abaarta, sida booqashada lagu ogaaday ayna xaqiijiyeen xubnaha bulshada ee la waraystay. Bulshadu waxay rajo xumo ka muujiyeen in dhismiha biyo xireenka ka dib, aysan jirin wax dabagal ah oo ay sameeyeen Unugga Hirgelinta Mashruuca si loo hubiyo shaqeynta goobta biyaha iyo ka faa'iideysiga bulshada. Haddaba, in kasta oo kaabayaashoodu ay jiraan, haddana ma hirgelin ujeeddadii ahayd in bulshada laga yareeyo culeyska biya la'aanta.

| | |
|---|---|
| <i>Biya xireenka Dibiyalaay oo aan shaqeyneyn</i> | <i>Nadaamka nadiifinta biyaha oo aan la rakibin ayaa laga helay qolkawaardiyaha ee biya xireenka Dibiyalaay</i> |
|  |  |
| <i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 12 June 2024</i> | <i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 12 June 2024</i> |

| | |
|---|--|
| <i>Matoor aan la rakibin biya xireenka Dibiyalaay</i> | <i>Nidaamka bamgaraynta biyaha ee Dibiyalaay oo aan la rakibin</i> |
|  |  |
| <i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 12 June 2024</i> | <i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 12 June 2024</i> |



4.2.5 Biya xireenka Haffir ah ayaa laga dhisay deegaanka Biyocade ee dowlad goboleedka Galmudug waxaana ku baxay lacag dhan **US\$144,820**. In kastoo biyo-xireenka laga dhisay tuulada Biyocade ee dowlad goboleedka Galmudug uu shaqeynayo, haddana waxaa la ogaaday gaabisyo dhowr ah oo ku saabsan waxtarkiisa iyo sii jiristiisa mustaqbalka fog. Halka cillad ee ugu weyn ayaa ahayd meelaynta marinnada biyaha ee aan saxda ahayn, taasoo keentay inay biyuhu ka soo qulqulaan jihooyin kala duwan. Kala sarreynta kanaalka biyaha ayaa keentay cadaadis aan sinneyn inuu fuulo biya celiyaha taasoo keentay burbur iyo nabaad

guur meelaha qaar. Intaa waxaa dheer, kanaalka biyaha ka saara biya xireenka, oo loogu talagalay in uu saaro biyaha dheeraadka ah marka uu biyo-xireenku buuxsamo ayaa sidoo kale waxyeello gaartay. Intaa waxaa dheer, nidaamka tamarta soolarka ee lagu rakibay goobta ayaa la ogaaday inuusan ku filneyn inuu si wax ku ool ah u taageero qulqulka biyaha. Sida uu sheegay masuul bulsho iyo xubin ka tirsan bulshada, matoorka korontada ayaan la gaynin goobta, inkasta oo uu ku jiray Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) qandaraaska lacagtriisiina la siiyay qandaraaslaha. Waxaana koronta la'aantu keentay in ay hoos u dhacdo habsami u socodka biyaha laga soo dhaamiyo haanta lana gaarsiiyo goobaha tubooyinka.

| | |
|--|---|
| <p><i>Cadaadis aan sinnayn ayaa sababay burbur iyo nabaad guur meelo qaar</i></p> | <p><i>Kanaalka biyaha saaraha waxyeelloobay oo ay ugu wacan tahay cadaadiska biyaha ka soo qulqulaya jihada khaldan</i></p> |
|  |  |
| <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 13 June 2024</i></p> | <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 13 June 2024</i></p> |

4.2.6 Biyo xireen qiimihiisu yahay \$128,868.93, ayaa laga hirgaliyay Wadgelinsoor oo ka tirsan dowlad goboleedka Galmudug. Si kastaba ha ahaatee, booqashada goobta lagu sameeyay ayaa lagu ogaaday gaabisyo la xiriira dhismaha. Waxaa la xaqiijiyay in qulqulka biyaha ee haanta uu hakad galay sababtoo ah kontoroolka bamka cadceedda ku shaqeeya oo lagama maarmaan u ah socodsiinta iyo gudbinta biyaha ayaan shaqaynayn maadaama ay waxyeello gaartay. Waxyeelladan soo gaaray kontoroolka bamka biyaha ayaa sababtay in bulshada ay biyo la'aan noqoto muddo dhowr bilood ah, balse ka hor arrintan bulshadu wey ka faa'ideysan jirtay biyaha. Intaa waxaa dheer, in kasta oo qalabka sifeynta iyo daweynta biyaha ee UV la soo iibiyay lana geeyey goobta si biyaha loogu sifeeyo, lama rakibin, taa oo sababtay in aysan bulshadu ka faa'iideysan. Xaaladdan la soo

deristay kontoroolka bamka, ayaa caqabad ku noqotay in bulshadu hesho biyo nadiif ah oo ay cabaan noloshooda kalana ku maareystaan.

| | |
|--|--|
| <p><i>Qalabka nadiifinta biyaha oo aan la rakibin oo yaal guriga waardiyaha, Wadgelinsoor.</i></p> | <p><i>Kontoroolka bamka soolarka oo aan shaqeyneyn oo yaal qolka waardiyaha, Wadgelinsoor.</i></p> |
|  |  |
| <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 12 June 2024</i></p> | <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 12 June 2024</i></p> |

Gunaanad

Natijoooyinka baaritaanku waxa ay muujinayaan natijoooyin togan iyo kuwa taban oo la xiriira goobaha biyaha ee la dhisay iyo kuwa dib loo cusbooneysiisay ee goobaha la booqday. Guud ahaan, toddobo goob biyood ayaa la kormeerey, iyadoo laba ka mid ah ay shaqeynayaan, saddex goob biyood na oo la booqdayna ay aad u liiteen, halka , halka laba kalena ayna shaqeynaynin gabi ahaanba. Cilladaha la ogaaday waxaa laga yaabaa inay ka dhasheen qorsheyn, fulin, iyo dayactir xumo goobaha biyaha qabta. Saameynta cilladaha la arkay waxa ay saameyn ku leeyihiin waaritaanka goobaha biyaha ee leh ee waxqabad ahaan liita, taasoo keenta in bulshada ay kasii cawdaan yaraanta biyaha, taasoo sidoo kale sababi karta dhibaatooyin la xiriira caafimaad ka.

Talooyin

Waxaan ku talinaynaa in Unugga Isku-duwidda Mashruucauu qaado tallaabo uu ku xalliyo kuna saxo cilladaha la ogaaday ee dhismaha goobaha qabta biyaha. Si looga hortago fashilka mustaqbalka, waxaan sidoo kale ku talinaynaa in la hirgeliyo

xakameyn tayo oo adag, maareyn mashruuc oo xooggan, iyo ka talagelin bulsho oo ku aaddan hawlaha iman doona ee la midka ah kuwan.. Unugguna waa inuu mudnaanta siiyo isticmaalka agab tayo sare leh, shaqaale xirfad leh, iyo maareyn maaliyadeed oo hufan.

Jawaabta Maamulka



Daadadkii 2023 waxay waxyeelleeyeen kaabayaashii sida aasaaska, deyrka iyo marinada biyaha. Sidoo kale fatahaadda ayaa keentay geeri iyo barakac. Dhammaan biyo-xireennada waxaa saameeyay roobabkii aadka u sarreeyay ee El Nino sannadkii hore. Burburka dhismaha waxaa sabab u ah isticmaalka muddada dheer ee goobaha biyaha, kormeer joogto ah iyo dayactir ayaa loo baahan yahay. Goobaha qaarkood, bulshada iyo qandaraasluhu waxay kordhiyeen dhererka ama qotada halkii ay ku joojin lahaayeen cabbirka asalka ah ee ku xusnaa Faahfaahinta Shuruudaha iyaga oo uga gol lahaa inay kordhiyaan awoodda biyo-xireennada. Mashruuca Barwaaqo ee hadda socda ayaa go'aansaday in ay dib-u-eegaan goobaha laga hirgeliyay mashruuca Biyoole. Unugga Hirgelinta Mashruuca wuxuu Maarso 2024 qiimeyay khasaaraha wuxuuna diyaariyay qorshayaal lagu xalinayo iyada oo uu dayactirayo mashruuca Barwaaqo. Barwaaqo ayaa sidoo kale horay u soo saartay go'aano lagu dayactirayo biyo-xireennada Biyoole, ee Galmudug iyo Koonfur Galbeed haddii loo baahdo, si loo hubiyo joogtaynta kaabayaasha biyaha.

4.2 Cilladaha ka jira biyo xireennada la dhisay iyada oo aan salka bac loo dhigin

Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) ee loogu talagalay in lagu dhiso biya xireennada Galmudug ayaa waxaa ku jiray qodob ay ka mid yihiin "Iibka, daabulka, iyo in la geeyo meeshii loogu tala galay bacaha HDPE oo 1.5 mm ah iyo wax kasta oo lagama maarmaan u ah in shaqada lagu dhammaystiro iyadoo la raacayo tilmaamaha Injineerka". Si ka duwan Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) loogu talagalay in lagu dhiso goobaha biyaha ee dowlad goboleedka Koonfur Galbeed, tilmaamaha ayaa waxaa ku jiray qeyb cadeyneysa "in walxaha la qodayo ay ka koobanyihiin dhoobo, baaritaannada lagu sameeyay muunadaha laga soo qaaday dhulka qeybtiisa sare iyo kuwa hoose ee durdurrada biyaha ayaa muujinaya in ciiddu tahay mid dhegan biyahana aan deyneynin. Sababtan awgeed, biyo xireennada mustaqbalka uma baahna dahaar balaastig ah.

Inta ay socotay baarista, waxaa la ogaaday in biyo xireeno gunta loo dhigay bacaha ee laga dhisay dowlad goboleedka Galmudug ay ka biyo celis fiicnaayeen kuwa Koonfur Galbeed ee la dhisay baca la'aan. Waxaa la arkayay in mid ka mid ah Biyo xireennada ku yaalla Degaanada Maamulka Koonfur Galbeed uusan aruurin, keydina biyaha roobka. Arrintan ayaa booqashada lagu soo hubiyay iyadoo sidoo kale ay xaqiijiyeen xubno ka tirsan bulshada, kuwaas oo sheegay in biyuhu ay ka duseen salka biyo-

xireenka. Intaa waxaa dheer, biyo-xireenno kale oo ku yaalla Koonfur-galbeed ayaa iyaguna ay ka muuqatay in aysan awood badan u lahayn kaydinta biyaha. Arrintan ayaa laga yaabaa inay ka dhalatay qorsheyn aan sax ahayn, kaa oo lagu gaaray go'aanka ah in biyo xireenadu aysan u baahnayn dahaar bac ah oo gunta loo dhigo oo biyahana celiya.

| | |
|--|--|
| <p><i>Biyo xireen laga dhisay Koonfur Galbeed oo aan keydkiisu weyneyn</i></p> | <p><i>Ciid qoyan oo laga soo ururiyay dhulka biyo-xireenka, taasoo muujinaysa in biyuhu ay gudbeen</i></p> |
|  |  |
| <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 17 Maarso 2024</i></p> | <p><i>Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 17 Maarso 2024</i></p> |

Gunaanad

Maqnaanshaha bacaha biyaha celiya ee biyo-xireennada dowlad goboleedka Koonfur-galbeed ayaa biyo badan khasariyay ka dib markii biyuhu dhulka u duseen taas oo wax u dhintay waxtarka biya-xireennada. Ilduufka keenay inaan baco gunta loo dhigin biya xireennada ayaa si toos ah oo taban u saameeyay in mashaariicdan kaabayaasha biyaha laga gaaro u jeeddadii laga lahaa oo ah in bulshada loo helo ilo biyood la isku halayn karo oo waara.

Talooyin

Waxaan ku talinaynaa in Unugga Isku-duwidda Mashruuca (PCU) iyo Unugga Hirgelinta Mashruuca (PIU) uu wax ka qabto arrinta muhiimka ah ee biyaha lumaya ee ka dusaya gunta biyo-xireenka si loo hubiyo sii waaridda biyo-xireennada loo dhisay in ay bulshadu ka faa'iideysato. Waxaa lagula talinayaa in mudnaanta la siiyo isticmaalka bacaha la geliyo salka biya xireennada si kor loogu qaado kaydinta biyaha loona hubiyo cimri dhererkood.

Jawaabta Maamulka

Shirkadda Injineerada ee mashruuca siineysay taageerada farsamo iyo talooyinka ayaa xaqiijisay in isticmaalka dahaarka biyaha celiya ee HDPE (Density Polyethylene) aan lagu talinayn in loo isticmaalo biya-xireennada Koonfur-galbeed marka la fiiriyo waxa ay ka samaysan tahay ciidda iyo qaab-dhismeedkeeda. Ciidda inta badan deegaanka waa dhoobo, taas oo is haysata, biya deymeeduna yar tahay, biya celiskeeduna sarreeyo. Marka la eego sifooyinkan ciidda carra madowga ah, iyada ayaa ku filan celinta biyaha, taa oo meesha ka saartay baahida loo qabo bacaha biyaha celiya ee HDPE oo sida caadiga ah loo isticmaalo meelaha leh ciidda biyaha deysa. Awoodda carra madowdu u leedahay heynta biyaha, ayaa waxay ka dhigantahay in kaabayaasha biyaha keydiya sida balliyada iyo biya xireennada ay heyn karaan biyaha iyada oo aan loo baahan baco. Talo soo jeedinta ku soo baxday warbixinta baaritaanka ayaa muddo dheerba mashruucu ku dhaqmayay si loo hubiyo in biyaha si fiican loo hayo. Mashruuca Barwaaqo, dhammaan Biya xireennada haffir waxay lahaan doonaan bacaha biyaha celiya.

4.3 Maqnaashaha caddeymo ku filan oo lagu taageerayo howlaha Beeraha iyo Xoolaha ee laga hirgeliyay Tuulada Boonkaay ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed

Sida laga soo xigtay Dukumentiga Qiimaynta Mashruuca (PAD), howlaha hoos yimaada taageerada beeraha iyo xoolaha waxaa ka mid ah samaynta beero bulsho iyo geed miroodyo (loo isticmaalayo qaab waxbarid iyo tusaaleyn); soo iibinta iyo qaybinta abuurka la hagaajiyay iyo agabyada kale; iyo hirgelinta hababka waraabka-yar-yar ee waxtarka sare leh, qiimaynta heerka nafaqo ee ciidda, iyo tababarka loo baahan yahay ee diiradda saaraya kor u qaadida xirdadaha beeralayda ee uguuridda qaab beerashada la jaan-qaadi karta cimilada.

Intii uu socday baarista waxaa dib u eegis lagu sameeyay warbixinta horumarka ee la xiriirta howlaha beeraha ee laga fuliyay dowlad goboleedka Koonfur Galbeed. Waxaa la ogaaday in hawlo ay ka mid yihiin, samaynta beero loo isticmaalayo qaab waxbarid iyo tusaaleyn, qaybinta abuurka la hagaajiyay, hirgelinta hababka waraabka yar yar ee waxtarka leh, qiimaynta nafaqada ciidda, iyo tababarida beeralayda laga fuliyay deegaanka Bonkaay ee dowlad goboleedka Koonfur Galbeed. Intii ay socotay kormeerka goobta, codsiga ka yimid kooxda baarayaasha e ku aadanaa hubinta darjiimooyinka bulshada ee Bonkai waxaa fulin waayay wakiillada labaarayaasha. Haddaba, kooxda baarayaasha waa ay xaqiijin kariwaayeen wax ka mid ah howlaha beeraha ee kor ku xusan ee Koonfur Galbeed.

Gunaanad

Goobta oo aan la tagi karin sababo la xiriira labaarayaasha oo aan wadashaqayn iyo fududayn samaynayn ayaa shaki gelinaysa saxnaanta warbixinnada ku saabsan hawlaha beeraha. Hufnaan la'aanta jirta ayaa caqabad ku ah qiimaynta waxtarka hawlaha beeraha ee ka socda Koonfur Galbeed iyo gaarista natiijooyinkii laga filayay.

Talooyin

Waxaa lagula talinayaa in PIU ay siiso marin aan xadidnayn dhammaan hawlaha mashruuca si baaritaanada mustaqbalka loogu hubiyo si madaxbannaan.

Jawaabta Maamulka

Kooxda hirgelineysay baarista waxaqabadka ee tijaabada ah lama sameyn xiriir Unugga hantidhowrka ee Dawlad Goboleedka taas oo keentay isfahamwaa, hakisayna kooxdii baaritaanka safarradoodii. Mashruucu waxa uu isku dayay in uu taageero kooxda, in kasta oo ay jireen qorshayaal is bed-bedelayay iyo xiriir xumo. Kooxda Dowlad Goboleedku waxay ku taageertay kooxda barista iyaga oo tusaya goobaha la booqday, dokumentiyadana ku soo diray email. Mashruucu waxa uu gaaray yoolashii waqtiga dhexe iyo guud ahaan hawlaha mashruuca ee hoos yimaada qaybtan. Kooxda kormeerka tijaabada uma aysan suurta gelin inay booqdaan Bonkaay maadaama ay safar usoo ahaayeen Muqdisho maalinka xigay, waxayna weydiisteen in dokumentiyada loo soo diro. Beerta tusaalaha iyo waxbaridda ee Bonkaay waxaa laga hirgeliyay hawlo isku dhaf ah oo la xiriira beeraha, xoolaha iyo deegaanka sida dib-udhireynta, beerta tusaalaha, iyo soo saarka calafka. Si guul leh ayaa loo hirgeliyay oo lagu wareejiyay iyadoo shaqaynaysa.

Jawaabta XHG

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Soomaaliya waxa uu bogaadinayaa wada shaqeynta dhinacyada la baaray inta ay socotay hawsha baaristu, gaar ahaan fududeynta gaaritaanka goobaha kala duwan ee kooxdeenu booqatay. Si kastaba ha ahaatee, kooxda hantidhowrku waxay caqabad kala kulmeen booqashada hawlaha beeraha ee Bonkaay. Baaritaanka ka hor, kooxdu waxay si cad u sheegeen in qiimaynta ay ka mid ahaan doonaan hawlaha beeraha ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed. Tani waxay ahayd qayb muhiim ah oo ka mid ah qorshahaheena baarista, waxaana loo qoondeeyay wakhti ku filan booqashooyinka goobaha.

4.4 Beeraha Bulsho ee la hirgeliyay oo isugu jiray kuwo shaqeynaya iyo kuwo aan shaqeyneyn.

Howlaha Beeraha iyo Xoolaha ee laga fuliyay Ballihigis, iyo Laanle oo ka tirsan Maamulka Galmudug.

Hawlaha gaarka ah ee laga fuliyay goob kasta waxaa ka mid ah:

- In la sameeyo beero bulsho iyo geed miroodyo (oo ah goobo tusaale ah).
- Soo iibinta iyo qaybinta abuurka la hagaajiyay
- Hirgelinta habka waraabka yar yar
- Tababaro loo fidiyo beeralayda

4.5.1 Sida ku cad Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) ee qaybta ka ah qandaraasyada lala galay shirkadaha, dhismaha beeraha loo isticmaalayo tusaaleynta waxaa ka mid ahaa keenista iyo rakibidda afar haamood oo 1,000-litir ah oo ay weheliyaan lugahooda. Haamahan midkiiba wuxuu ku kacay \$1,200. Haamahan ayaa loogu talo galay beeraha bulshada ee tuulooyinka Ballihigis iyo Laanle si kor loogu qaado kaydinta biyaha iyo waxtarka waraabka yar yar. Hase-yeeshee, intii ay baaristaku jireen, ayaa kooxda hantidhowrku waxay ogaadeen in haamihii biyaha aan midna la rakibin, inkasta oo la bixiyay lacag dhan \$9,600.

4.5.2 Deegaanka Ballihigis ee Dowlad Goboleedka Galmudug, waxaa laga fuliyay hawlo beero oo ay ku baxday lacag dhan \$127,000. Si kastaba ha ahaatee, baaristu waxay daaha ka qaaday gaabisyo la xiriira waaritaanka beerahan bulsho. Kooxda hantidhowrku waxay ogaadeen in dalagyada ay ka mid yihiin basbaaska, yaanyada, qaraha, iyo digirta ay si weyn u waxyeelleeyeen cayayaannada, iyaga oo u muuqday kuwo la dayacay. Intaa waxaa dheer, Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) wuxuu qeexayay beerista timirta, qumbaha, iyo geedaha canbaha, laakiin mid ka mid ah geed miroodyadaas laguma soo arag beerta markii la booqday. Sida laga soo xigtay bulshada, miraha la beeray ayaa la goostay dhowr jeer oo keliya tan iyo markii beerta la aasaasay. Intaa waxaa dheer, sida ay sheegeen, bulshadu, lama siin tababbar ku filan oo la xiriira xirfadaha beerashada taa oo keentay gaabisyada dhinacyada dayactirka iyo waaridda beerta.

Beerta bulshada ee lagu arkay Ballihigis



Xigasho: Booqashada goobta ee XHG Sawirka la qaaday 13ka Juun 2024

4.5.3 Lacag dhan 126,471.32 doollar ayaa lagu kharash gareeyay hawlihii beeraha ee laga hirgeliyay deegaanka Laanle ee dowlad goboleedka Galmudug, waxaana intii ay baarista ku jireen kooxda hantidhowrka ay u kuur galayeen fursadaha kor loogu qaadi karo waaritaanka beerta loo sameeyay bulshada. Dalagyada sida bocorka, yaanyada, koostada, iyo qaraha ayaa la beeray, waxayna ahaayeen kuwo wanaagsan. Baarista ayaa sidoo kale u kuurgashay geed miroodyada la beeray sida Canbaha, Muuska, Qumbaha, Saytuunka iyo Liinta. Sida ay sheegeen dadkii ku sugnaa beertan, bulshada waxaa la siiyay tababaro ku filan, sidoo kalena bulshada waxaa lagu wacygeliyay doorkooda iyo waajibka ka saaran beerta.

Geedka Qumbaha oo ku yaala deegaanka Laanle ee Galmudug State

Bocor



Gunaanad

Natiijooyinka baaritaanka waxa ay muujinayaan natiijooyin togan oo ku saabsan horumarinta hababka beerashada ee goobta Laanle, sidoo kale waxaa la ogaaday tayo xumo daran oo la xiriira waxqabadka taas oo saameyn ku leh joogteynta hawlaha laxiriira beeraha ee ka socda goobta Ballihigis.

Talooyin

Waxaan lagula talinaynaa in unugga isuduwidda mashruuca (PCU) iyo Unugga Hirgelinta Mashruuca, PIU wax ka qabto gaabisyada la arkay. Waxaa lagula talinayaa in mudnaanta la siiyo u hoggaansanaanta qorshayaasha mashruuca, kor u qaadida maamulka iyo kormeerka mashruuca, maalgelinta tababarka beeralayda oo dhamaystiran, iyo in bulshada si xoog leh looga qeyb geliyo hawlaha mustaqbalka ee noocaan ah.

Jawaabta Maamulka

Mashruucan ayaa si habsami leh u gaarsiiyay beeralayda tababaro, waxaana sidoo kale la beeray dhamaan miraha ku qeexan Faahfaahinta Shuruudaha (BOQ) sida lagu sheegay warbixinnada, hase yeeshee dayactirka iyo ka shaqaysiinta kaabayaasha waxaa iska leh bulshada marka uu mashruucu xirmo beertnaa bulshada lagu wareejiyo. Wareejinta ka hor waxaa jiray shirar is xig-xiga oo bulshada lala yeeshay iyo wacyi gelin.

LIFAAQYO

a) Lifaag I: Dokumentiyada Dib-loo-eegay

Shaxda 2.4.1:

| Dokumentiyada dib-loo-eegay | Sababta dib-u-eegista |
|--|--|
| Heshiiska Maaliyadda | Si loo ogaado in shuruudihii laga wadahadlay la hirgeliyay gaar ahaan, in la fahmo doorarka iyo waajibaadka Wasaaradda Qorshaynta (PCU), Guddiga Hoggaaminta, iyo wasaaradaha kale ee maamulka ku jiray ay ku lahaayeen maamulka iyo kormeerka mashruuca. |
| Dokumentiga Qiimaynta Mashruuca (PAD) | Si loo fahmo asalka mashruuca, qiilka, yoolalka, ka-faa'iideystayaasha, qaybaha, silsiladda natiijooyinka, caddaynta ka-qaybgalka Bangiga Adduunka, doorarka la-hawlgalayaasha, iyo falanqaynta farsamo ee qorsheynta, fulinta, iyo la socodka natiijooyinka. |
| Hagaha Hirgelinta Mashruuca (POM) | Si loo faahfaahiyo habraacyada iyo mabaadi'da hawlgelinta iyo hababka ay tahay in la raaco si loo dhaqangeliyo qaybaha mashruuca, oo ay ku jiraan tallaabooyinka ku lug leh qorsheynta, doorashada, helitaanka, maareynta, iyo kormeerka fulinta dhammaan hawlaha kale ee mashruuca. |
| Qorshaha Hirgelinta Mashruuca ee Sannadlaha ah | In la falanqeeyo in tilmaamayaasha waxqabadka la raacay intii uu socday mashruuca iyo in la eego in qaybaha mashruuca loo fuliyay sidii loo qorsheeyay. |
| Warbixinta Kormeerka Qiimaynta iyo | Si loo go'aamiyo in ujeedooyinka mashruuca la fuliyay iyo in hawlaha loo fuliyay si waafaqsan qorshaha. |

b) Lifaaq II: Daneeyaasha la Wareystay

Shaxda 2.4.2:

| Hay'adaha | Shaqsigu la wareystay | Ujeedda wareysiga |
|--|--|--|
| PCU Wasaaradda Qorshaynta Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha | - Isu-duwaha Mashruuca | Si loo helo fahamka guud ee maamulka mashruuca marka la eego fulinta iyo ka guul keenidda qayb kasta. |
| | Khabiirka Maamulka Maaliyadda | Si loo fahmo sida mashruuca loo maalgeliyay, qoondaynta, iyo sida kharashaadka loo bixiyay intii lagu jiray fulinta mashruuca. |
| | Khabiirka iibka | Si loo fahmo hababka tirada badan ee loo isticmaalo gadashada badeecadaha iyo adeegyada iyo sidoo kale hababka loo codsado diidmo la'aanta Bangiga Adduunka. |
| | Injineerka Mashruuca | Si loo helo faham ku saabsan hababka kala duwan ee injineernimada ee qorsheynta, jadwaleynta, iyo qiimeynta hawlaha dhismaha dayactirka oo ay isticmaalaan qandaraasleyaasha (naqshadaynta dhismaha iyo dayactirka, qiyaasta qandaraaska BOQs, faahfaahinta iyo shuruudaha kale ee farsamada). |
| | Khabiirka kormeerka iyo qiimeynta | Si loo ururiyo aqoonta hababka kormeerka iyo qiimeynta, oo ay ku jiraan xaaladda mashruuca uu markaas ku suganyahay, caqabdaha la ogyahay, iyo farsamooyinka yaraynta khatarta. |
| PSC | Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha | Si wax badan looga barto kormeerka istiraatijiyadeed ee muddada fog, jihada, talooyinka ay Guddidu ansixisay ee qoondaynta kheyraadka, iyo xulashooyinka kale ee muhiimka ah ee la xiriiray. Iyo in la fahmo wada shaqaynta guddiga ee PIU iyo sida ay gacan uga geysatay fulin wax ku ool ah. |

| | | |
|-----------------------|-------------------|---|
| Ka faa'idaystayaa sha | 10 Shakhsi | Si loo qiimeeyo horumarka la sameeyay tan iyo markii mashruuca la hirgeliyay. Si loo baaro in tababarkii la siiyay beeralayda ee ku saabsanaa farsamooyinka beeralayda ee haboon iyo in bulshada looga qeyb geliyay si wax ku ool ah. |
|-----------------------|-------------------|---|

c) Appendix III: Sites visited.

Table 2.4.3

| Sites | Activities | Observation |
|--------------|---------------------------------------|--|
| Afuugdi | Development of multiple water sources | The rehabilitated borehole was found to be sustainable water source effectively serving both human and livestock needs in the community. |
| Warmakiinaay | Development of multiple water sources | The audit revealed a systemic failure in the planning, implementation, and maintenance of water catchment projects. Despite substantial investments, most inspected water points are either non-functional, significantly underperforming, or may pose serious health risks to the community. These failures are primarily attributed to poor activity design, substandard construction, and the absence of essential equipment. The consequences of these deficiencies are terrible, as communities continue to suffer from water scarcity, and this may lead to related health issues. This may be due to the lack of accountability and oversight in project management, and it has resulted in a significant waste of public funds and a |
| Awdiinle1 | | |
| Awdiinle2 | | |
| Diyalaay | | |
| Biyocade | | |
| Wadgelinsoor | | |

| | | |
|------------|-------------------------|---|
| | | failure to establish proper water points to the intended beneficiaries thus the overall project objective was not met accordingly. |
| Ballihigis | Agricultural Activities | The absence of essential items such as the water tanks in both Ballihigis and Laanle, coupled with inadequate farmer support in Ballihigis site , has resulted in suboptimal outcomes. |
| Laanle | | |